



Ballanqaadka muwaadinka ee maxalliga

Skäggetorp 2024-2025

Sababaha ka dambeeya ballanqaadka

Degmada Linköping iyo booliiska oo ay weheliyaan 17 hawlgalayaal ah ayaa diyaariyey ballanqaadka muwaadinka ee Skäggetorp. Hadafku waa in kor loo qaado ammaanka iyo ku faraxsanaanta dadka deggan ama soo booqanaya xaafadda.

Waxaanu sidoo kale rabnaa in ay muwaadiniintu kalsooni weyn ku qabaan bulshada iyo in la yareeyo carruurta iyo dhallinyarada geleya dambiilanimada. Hadafka ayaa ah in mustaqbalka dambe Skäggetorp ay ka baxdo xaafaddaha loo arko in ay si gaar ah dhibaato u leeyihiin.

Skäggetorp waxaa ka jira is-xilqaan aad u weyn oo ka imaanaya milkiilayaasha guryaha, bulshada rayidka ah iyo ganacsatada si ay gacan uga geystaan ka hortagga dembiilanimada iyo hawlaha ammaan sugidda. Si la isugu duwo hawlgallada iyo tallaabooyinka, degmadu waxay bilowday iskaashi goobeed oo ay la sameysay hawlwadayaasha kala duwan ee ku sugan xaafadda. Iyadoo si wadajir ah ay hawlwadayaashu u soo saareen sawir guud oo xaaladda deegaanka ah. Waxaa ka muuqda dhowr waxyaabood oo wanaagsan iyo laakiin sidoo kale caqabado.

Marka laga soo tago tallaabooyinka la qaadayo ee ku jira ballanqaadka muwaadinka, waxaa hawlwadayaasha si wadajir ah iyo si gooni-gooni ahba loola qabanayaa shaqo weyn si loo hormariyo xaafadda.

Ujeeddada ballanqaadka muwaadinka ee maxalliga Skäggetorp waa in si habaysan loo shaqeeyo si looga hortago dembiilanimada iyo in la abuurto amni waara, iyadoo sidoo kale laga wada xiriirayo wixii loo qabtay dadka deggaanka ah iyo kuwa soo booqanaya xaafadda. Ballanqaadka muwaadinka ee maxalliga ahi wuxuu khuseeyaa inta u dhaxaysa agosto 2024 iyo diisambar 2025, waxaana dib u eegis lagu samaynayaa, lana soo bandhigayaa seddax jeer sannadkiiba.

Natiijooyinka waxaa dadka loogu soo bandhigi doonaa baraha bulshada iyo bogga www.linkoping.se





Ballanta aanu sida wadajirka ah kuugu qaadayno adiga!

Dhammaan dhinacyadu waxay ballanqaadayaan inay sii wadaan ka qaybqaadashada iyo horumarinta iskaashiga xaafadda Skäggetorp.. Iskaashiga xaafadda gudaheeda ayaan dejin doona qorshe hawleed ay dhinacyadu si wadajir ah u fulin doonaan, kaas oo mustaqbalka fog iyo kan dhowba lagu hormarinayo xaafadda.

Dhammaantood waxay ballanqaadeen inay si wadajir ah u fulinayaan lix wakhti oo lagu dhex soc- soconayo xaafadda si ammaanka loogu sugo iyo saddex wadhadal oo muwaadiniinta loogu talagalay si kor loogu qaado joogitaanka xaafadda habeenkii iyo in si joogto ah loo aqoonsado baahiyaha meesha ka jira oo lala socdo tallaabooyinkii la qaaday. Waxa diiradda lagu saarayaa waa in la helo aragtiyada kala duwan ee ka yimanaysa kooxaha hadafku yahay ee kala duwan gaar ahaan sinnaanta iyo amniga dumarka.

Hadaanu nahay dadka ka qaybqaadanaya:



1. Kor u qaadida amniga iyo ku farxida deegaanka dadweynaha

Cilmi baarisyadii amniga ee maxalliga ahaa ee la sameeyey waxay muujinayaan in amni darrooyinka Skäggetorp ay ka sarreeyaan xaafaddaha kale iyo in haweenku ay dareemayaan amni darro ka badan tan ragga. Dhaawacyada, qashinka ku tuurida, iyo amni darrooyinka bannaanka, gaar ahaan habeenkii, ayaa si gaar ah uga muuqda xaafadda iyadoo meelaha qaarkood iyo waddooyin qaarkood ay yihiin kuwo si gaar ah amni darro u leh.

Ururka mulkiilayaasha guryaha ee Skäggetorp oo ay ka kooban yihiin Lejonfastigheter, Willhem, Victoriahem iyo Stångåstaden waxay si wadajir ah uga shaqaynayaan arrimo la xiriira: amniga deegaanka, qabweynaanta xaafadda, wakhti firaaqo oo macno u leh carruurta iyo dhallinyarada, iyo fursado shaqo oo badan Ururka ayaa la shaqeynaya ganacsatada iyo bulshada rayidka ah si ay uga qabanqaabiyaan hawlo kala duwan xaafadda.

Degmada, booliiska, Stångåstaden, Willhem, iyo Lejonfastigheter waxay kulmaan ugu yaraan hal mar todobaadkii iyadoo ka shaqeynaya habka la yiraahdo "Isku-dubarid Waxtar leh oo Amniga khuseeya" (EST) si ay u fuliyaan tallaabooyin ku saleysan sawirka guud ee xaaladda Skäggetorp. Ujeeddada laga leeyahay EST waa in laga hortago dembiyada iyo amni darrada goobaha dadweynaha.

Skäggetorp Centrum


Willhem waxay si wadajir ah booliiska ula fulin doonaan habka jaranjarada amniga, oo gaar ahaan lagu fulin doono jaranjarooyinka aan ammaanka ahayn/jaranjarooyinka guryaha ee dembiyada u nugul. Waxay qaadi doonaan tallaabooyin farsamo oo kor loogu qaadayo amniga Skäggetorp Centrum, iyadoo tusaale ahaan laga taagayo tabbeellooyin cusub, la qaadayo tallaabooyin maamul oo meesha wax lagaga qabanayo, lana hormarinayo centrumka iyo horumarinta xarunta iyadoo lala kaashanayo ganacsatada iyo macaamiisha. Waxay sidoo kale xoojin doonaan iftiinka goobta iyada oo la kordhinayo 45 meelood oo iftiin leh.

Ganacsatada suuqu way ka qaybqaadanayaan iskaashiga goobta, waxayna gacan ka geysanayaan sawirka guud iyo tallaabooyinka wadajirka ah.

Beerta nasashada (aktivitetsparken) iyo garoonka kubbadda cagta

Maamulka deegaanka iyo dhismaha bulshadu waxay dhammaystiri doonaan beerta nasashada (aktivitetsparken) iyo mashruucyada naqshadaynta ee Skäggetorp sannadka 2024.

Adeegga bulshada dhow, ilaaliyeyaasha degmada/waardiyeaasha, booliiska, iyo ururada bulshada ayaa si wadajir u fulin doona tallaabooyin ku saabsan garoonka kubbadda cagta, iyadoo diiradda la saarayo kordhinta joogitaanka goobta iyo caddaynta agaagarka goobta. Ka hawlgalayaasha goobta (aktörerna) ayaa kulmaya waxyar ka hor inta aan la bilaabin hawsha wakhtigaa la qabanayo, si ay u wadaagaan jihada iyo qorshaha hawsha.



2. Kor u qaadidda kalsoonida bulshada

Skäggetorp, aqoonta bulsheed iyo kalsoonida lagu qabo hey'adaha bulsheed ayaa lagu qiimeeyaa inay tahay mid hoosaysa, taas oo khatar gelin karta faafinta macluumaadka khaldan. Waxaa deegaanka ka jira dhaqan aamusnaan ah oo ay dadku ka baqayaan inay fal-dembiyeed farageliyaan, isku xirnaanta/kalsoonida uu midba midka kale ku qabo ayaa ka hoosaysa marka loo eego dhowr meelood oo kale.

Helitaanka iyo aqoonta

Xafiiska adeegga bulshada ee goobta ee maxalliga ah ayaa xafiis ka furaya Skäggetorp Centrum bisha sebteembar 2024 waxayna booqanayaa iskuulada aagga ku yaala si ay tusaale ahaan uga warbixiyaan dembiilanimada.

Booliiska ayaa sannad walba ka qayb qaadanaya shirarka waalidiinta ee dhamaan dugsiyada Skäggetorp, waxayna aagga ka fulin doonaa booqashooyin albaab garaacid ah si loo kordhiyo kalsoonida booliiska oo loo abuurto wada-shaqeyn dhex marta booliiska iyo dadka deegaanka.

Kontakt Linköping waxay joogaan goobta maalmaha la shaqaynayo oo dhan si ay dadka deggan uga caawiyaan xogta, codsiyada, kiisaska iyo la xiriiridda qaybta saxda ah ee qofka ka khuseysa dhinaca degmada, iyadoo ay taasi qayb ka tahay kor u qaadidda kalsoonida dadka meesha deggani ay ku qabaan bulshada.

Xarunta qoysaska ee aaggu waxay bixinayaan koorsooyin iyo muxaadarooyin waalidka loogu talagalay oo lacag la'aan ah Dugsiga furan ee xannaanada iyo SFI waxay bilaabeen wadashaqayn loogu talagalay qofka haysta ilmo 0-1 sano jir ah oo fasax waalidnimo ku jira inuu dhigan karo luqadda iswidhishka ee loogu talagalay ajaanibka (SFI). Waxaa koorsada lagu qabanayaa Dugsiga furan ee xannaanada ee Ryd, laakiin si aad uga qaybgasho uma baahnid inaad tahay qof deggan Ryd.

Dugsiyada xannaanada ee degmadu waxay fulin doonaan inay albaabbada guryaha garaacaan si ay dadka meesha deggan ugu wargeliyaan fursadaha ku aaddan shaqa hawleedka dugsiyada xannaanada.





Qaybta amniga ee degmadu waxay bixin doonaan ugu yaraan laba dadaal oo aqoon kororsi kaas oo ku saabsan saamaynta aan la oggolayn, oo loogu talagalay ka hawlgalayaasha (aktörer) maxaliga ah ee ka shaqeeya aagga.

Wadahadalo diimeed oo ka kooban wakiillo ka kala socda degmada, booliiska, Svenska kyrkan, Bosniakiska Islamiska Förbundet, Religion och kulturhus iyo Islamiska förbundet, ayaa kulmaya ugu yaraan 5-6 jeer sanadkiiba, waxayna fulinayaan hawlo wadajir ah oo ay ujeeddadeedu tahay in kor loo qaado aqoonta xagga arrimaha bulshada ee xubnaha ka tirsan urur-diimeedyada kala duwan.

Islamiska förbundet iyo degmadu waxay ka wada shaqeynayaan si ay u gaarsiiyaan macluumaad ku saabsan adeegyada bulshada, diyaarinta xaaladaha degdega ah, iyo macluumaadka kale ee bulshada, si loo kordhiyo kalsoonida loona yareeyo faafinta macluumaadka khaldan.

Adeegga dhow ee bulshadu waxay ku martiqaadeysaa dadka deggan Skäggetorp inay ka soo qaybgalaan ugu yaraan hal kulan macluumaad sanadkii, si ay uga warbixiyaan hawlgalkooda iyo inay ka hortagaan faafinta macluumaadka khaldan.

ABF waxay bixineysaa ugu yaraan laba koorso oo luqadda iswiidhishka ah iyo luqaddo kale, aqoonta IT-ga iyo sidoo kale aqoonta arrimaha bulshada iyo suuqa shaqada.

Jobcom waxay qabanqaabin doonaan wakhtiyo la iska imankaro oo afar fursadood ah oo lagu qaban doono muxaadaroyin kuwaas oo hogaamiyeyaasha shirkaduhu ay ka hadli doona qaybaha kala duwan ee shaqooyinka iyo sida loogu galo.

Stadsmissionen, ABF iyo Röda korset waxay carruurta iyo dhallinyarada deggan aagga siiyaan caawimaad ku saabsan casharrada guriga.

3. Yaranta carruurta iyo dhallinyarada geleysa dembiilanimada

Skäggetorp waxaa loo arkaa in 69% carruurta (0-17 sano) ay la nool yihiin dhibaato dhaqaale, taasoo aad uga sarreysa marka loo eego meelaha kale ee maxalliga ah iyo gobalkaba. Si ay carruurta iyo dhalliyadu u helaan lacag degdeg oo ay ugu iibsadaan cunto iyo dhar, waxay dembiilanimadu u noqon kartaa waxay ku doorsadaan.

Isboortis aan qabanqaabsanayn oo kedis ah ayaa aad ugu badan Skäggetorp, waana wax sidoo kale ah fursad wanaagsan oo lagu soo qaban karo carruurta iyo dhallinyarada. Stadsmissionen iyo lammaanayaal ay isla shaqeeyaan ayaa laga soo billaabo 2024 xaafadda ka furay dukaanka cuntada ee "Matmissionen" oo ay xubnuhu qiimo jaban uga iibsan karaan cuntada.

Wakhti firaaqo oo macno leh oo loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada

i-HUSET iyo Stadsmissionen ayaa iska kaashanaya wakhti firaaqo oo macno leh oo loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada iyadoo lacagta laga helo "Matloftet" lagu bixinayo dadaallada maxalliga ah ee Skäggetorp.

Nygårdsskolan, Rosendalskolan iyo Ulleviskolan waxay siinayaa wakhti ay firiiddka ku joogaan dhammaan carruurta dhigata sannadaha 1-2 ee dugsiga hoose-dhexe, xitaa haddii aanay waalidku u baahnayn in loo hayo carruurta. Iskuuladu waxay maalin walba carruurta dhigata fasalada 4-6 siinayaan hawlo furan oo wax qabad ah oo waqtiga firaaqada ah oo bilaash ah.

Fritidslötsen waxay bixisaa hagitaan loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada si ay u helaan waxyaabaha ay xiiseeyaan wakhiga firaaqada.

Ciyaaraha

RF-SISU Östergötland waxay ka shaqaynaysaan inay xoojiyan joogitaanka isboortiga ee Skäggetorp iyada oo loo marayo isku dubarid, tababar, iyo taageero dhaqaale. Hadafku waa in la kordhiyo tirada aktiifiteetyada dhallinyarada ee jaaliyadaha.

Jaaliyadda dhallinyarada ee Skäggetorp waxay laba maalin toddobaadkii qabanqaabisaa kubbada cagta oo habeenkii la ciyaaro oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay carruurta da'doodu u dhexeyso 12-15 sano. Waxaa intaas dheer inay jaaliyaddu qabanqaabiso aktiifiteetyo kala duwan wakhtiyada iskuuladu fasaxa yihiin..

Guriga aktiifiteetka Taekwondo ee Linköping wuxuu Rosendalskolan ku bixiyaa tababar bilaash ah oo loogu talagalay gabdhaha iyo wiilasha. Waxaa intaas dheer inuu ururku waxbaro tababarayaal/hogaamiyayaal oo ay leeyihiin hawlo wax qabad inta fasaxyada iskuulada lagu jiro.

Naadiga kubbadda ee Hemgårdarna waxay bixinayaa hawlo kubbadda cagta ah oo loogu talagalay wiilasha iyo gabdhaha da'doodu tahay 8-15 ee Skäggetorp. Naadigu wuxuu inta lagu jiro xagaaga bixinayaa seddex toddobaad oo iskuul kubbadda cagta ah oo bilaash oo loogu talagalay da'da 8-13 jirrada ah iyo qayb kubbadda kolaygana waxaana la siin doonaa aktiifiteetyo loogu talagalay da'da 7-10 sano jirrada ah.

Dhaqan

Agora waxay ku xoojinayaan hawlaha ee hal qof oo ku shaqayn doona 75% oo ka shaqayn doonta inay carruur iyo dhallinyaro badan oo da'doodu tahay ilaa 12 jir ay helaan wakhti firaaqo oo micno leh.

Svenska kyrkan waxay shaqaaleysiisay muusikiiste cusub oo si gaar ah uga shaqeyn doona Agora, si loo abuurdo heeso si wadajir ah loo qaado loogu talagalay carruurta dugsiga dhexe.

ABF waxay xaafada ka abaabulaysaa dugsi filin ah oo ay 10 qof dhigan karaan, waxayna abaabulaysaa xaflad filin bisha oktoobar oo uu mawduuceedu yahay ka hortagga xagjirnimada iyo in la taageero dhallinyarada ku jira xaaladaha ka baxsan bulshada.

Hooyooyinka caalamku waxay maalmaha oo dhan ku bixin doonaan cetrumka waxqabadyo wakhtiga firaaqada oo leh hoggaamiye oo loogu talagalay hooyooyinka iyo carruurta xaafadda deggan. Dhallinyarada caalamku waxay laba maalin toddobaadkiiba bixin doonaan waxqabadyo wakhtiga firaaqada ah oo leh hoggaamiye oo loogu talagalay dhallinyarada.

Ung puls waxay centrumka ka bixinayaan aktiifiteetyo lacag la'aan ah iyagoo ay isla kaashanayaan jaaliyadaha- iyo hawladeenada kale (övriga aktörer). hawlaha waxaa diirrada lagu saarayaa dhallinyarada da'doodu u dhexeyso 13-18 sano.



Waqti firaaqo oo micno leh wuxuu yarayn karaa khatarta ka baxsanaanta iyo dembiilanimada.



Fursadda xagga waayo-aragnimada shaqada ee lagu helo shaqada, tababarrada shaqada ama shaqada xagaaga

Jobcom waxay 50 qof oo reer Skäggetorp ah ka caawinayaan inay shaqo ka helaan shirkado ku jira shabakadooda ay xiriirka la leeyihiin.

Lejonfastigeter waxay dhallinyarada da'doodu u dhexeyso 16-19 sano ee xaafadda deggan siinayaan 18 shaqo oo xagaaga ah oo ah meelaha bannaanka ah sanadkiiba.

IKEA waxay ka shaqaynayaan inay abuuraan wacyi galin wayn oo ku saabsan suuqooda maxalliga ah ee Skäggetorp. Waxay dadka ku martiqaadi doonaan muxaadaro bilaash ah oo ku saabsan in laga shaqeeyo shirkad waxa ay tahay, waxayna abaabuli doonaan siminaaro bilaash ah. IKEA waxay ka shaqayn doonaan hadafka ah in dad badan oo ka socda Skäggetorp ay galaan suuqa shaqada, waxayna 2025 bixin doonaan ugu yaraan laba boos oo tababar ah oo loogu talagalay kooxda loo dan leeyahay.

Stångåstaden waxay dadka xaafadda deggan u suurta gelinayaan inay Linkstep ka helaan caawimo ay shaqo ku helaan si ay isku filnaasho dhaqaale ugaaraan, waxayna carruurta iyo dhalinyarada xaafadda siin doonaan boosas baraahtiig ah iyo shaqo xilliga xagaaga.

Victoriahem waxay bixinaysaa shaqooyin iyaga oo u maraya barnaamijkooda ilaalinta deegaanka.

Röda korset waxay dukaankeeda second hand ee Skäggetorp Centrum ku yaala ka bixineysaa boosas baraahtiig ah, tababar shaqo iyo hawlo tabaruaad ah.

Stadsmissionen waxay bixineysaa hawlo horumarineed oo shakhsi ahaaneed loogu talagalay dhallinyarada da'doodu tahay 16-25 sano oo khuseysa waxbarashada iyo shaqada.

Ferieteamet ee qaybta Maamulka Is-dhexgalka iyo suuqa shaqada waxay bixinayaan shaqooyin xilliga xagaaga muddo seddex toddobaad ah oo loogu talagalay dhalinyarada, iyaga oo fulinaya amarka ka soo baxay Maamulka waxbarashada (Utbildningsförvaltningen).



Daadaallo ku wajahan carruurta iyo dhalinyarada khatarta ugu jira inay galaan dembiilanimada

SSPF (wada shaqayn ka dhexeysa dugsiyada, adeegga bulshada, booliiska iyo qeybta wakhtiyada firaaqada)

Skäggetorp, dugsiyada, adeegga dhow ee arrimaha bulshada, booliiska iyo qaybta wakhtiyada firaaqadu waxay iska kaashan doonaan carruurta/dhallinyarada dhigata fasalada 4-9 ee halis ugu jira inay galaan dembiilanimada iyo carruurta/dhallinyarada muujisa dabeecadaha ka baxsan xeerarka ama falalka dembiyada.

Rätt kurva

Booliiska iyo adeegga bulshadu waxay iska kaashan doonaan carruurta da'doodu tahay 8-15 sano, iyo qoysaskooda, halkaas oo ay jirto khatar sare oo ah inay carruurta ku lugyeeshaan dembiyo abaabulan. Shaqadaas iyada ah xitaa dugsiyada, xilliga firaaqada iyo suuqa shaqada ee degmada iyo sidoo kale ganacsatada iyo bulshada rayidku way ka qayb qaadanaayan.





Iskaan ku samee QR-koodka si aad u akhrido wax badan oo ku saabsan shaqada degmada Linköping ee la xiriirta iskaashiga deegaanka, ama booqo: linkoping.se/platssamverkan

